Naqshadda Ultimatum Design


Storgata 11, 0155 Oslo
T: 23 01 03 41
W: www.krisesenter.com

MAAMULKA MAGDHAWGA DHAAWACYADA DAMBIILENIMO EE NORWAY
- Ooy kujiraan Xafiisyada La-talinta Dhibbanayaasha Dambiga

La Cusboonaysiiyey 2013

**Xuquuqda sharciga iyo caawimada ee kuwa la kulmay ficilo dambiilenimo Norway**


*Haddaad la kulantay ficilo dambiilenimo oo ah xadgudub jidheed iyo/ama nafsiyeed, gabboodfal galmeed, guur khasab ah, gudniin ama ka ganacsi dad, waxaad si sharci ah u mutaysatay caawimo iyo ilaalin. buuganyarahani wuxuu ku siinayaa macluumaad kusaabsan waxaad mutaysatay iyo halka aad caawimo u doonan karto.*



Somalisk

"CIDNA MA OGA WAXA KA DHACAYA GURIGA. WAXAAN AHAY QOFKA KALIYA EE XANUUNKIISA DAREEMI KARA."

(hadal laga soo wariyey Mazocruz haweenay ka timi Puno, Peru)



Buugyarahan waxa taageeray maalgalinta ka timi Wasaaradda Caddaalada iyo Ammaanka Dadwaynaha

# 1. XADGUDUB

**1.1 Waxaad la kulantay ficil dambiilenimo haddii qofi:**

- Ku garaaco, laado, isku dayno inuu ku ceejiyo ama kugu dhaawaco mindi ama nooc kasta oo walax kale ah
- kugu keento dhaawac, tus., sarriinka halista ah, jug ama jabniin lafo
- kugu khasbo inaad samayso galmo adoon rabin
- kuugu hanjabo dil ama inuu si halis ah kuu dhaawaco sida sare ku xusan
- cid kuu guuriyo adoon rabin (guur khasab ah)
- kugu sameeyo ka ganacsiga dadka (waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo kusaabsan ka ganacsiga dadka Qodobka 1.2)
- kugu sameeyo gudista haweenka lagu sameeyo
- jidh ahaan kaa hor istaago xorriyadda dhaqdhaqaaqa tus., meel kugu xidho

Tallaabo dambiilenimo sidoo kale waxa la galaa haddii carruurtaadu ay la kulmaan xadgudub ama gabboodfal galmeed.

Argagax galina iyo gabboodfalka muddo dheer sidoo kale waa dambiyo, marka laga tago dhaawacyada jidheed ama nafsi ee aad leedahay habdhaqankan dartii.

Ficilada noocan ah waa dambi, xiitaa haddii qofka ay khusaysaa uu yahay:

- lammaanahaaga imika ama hore rafiiq/saaxiibkaaga aad la nooshahay/ saaxiibad
- waalidkaaga, waalid-badh
- carruurtaada
- qof gurigaaga jooga, tus., qof aad la nooshahay iyo qofka aad isku qoyska tihiin

Tallaabooyinkani sidoo kale waa dambiyo haddii kuwa galayaa ay sakhraansan yihiin ama daroogaysan yihiin wakhtiga ay dambiga galayaan.

**1.2 Goorma ayaad tahay dhibbane ka ganacsiga dadka?**

Haddii qofi faraha kula jiro waxa soo socda iyadoo loo kala soocayo xadgudub, hanjabaad, ka faa'idaysiga xaaladaha nugul ama habdhaqan aan habboonayn:

1. Kaaga faa'idaysto inaad samayso dhillaysi ama ujeedooyin jinsi oo kale

2. kugu khasbo inaad samayso tuugis ama inaad qaadato shaqo kale
3. kaaga faa'idaysto inaad qabato adeeg milatari oo firfircoon waddan ajanabi
4. kaa saaro xubnahaaga adoon oggolayn

**1.3 Waa lagaa faa'idaystay haddii:**

- Aan laguu oggolayn inaad yeelato waxaad xoogsatay, ama kaliya laguu oggol yahay inaad yeelato wax yar oggol yahay inaad yeelato wax yar
- aad gasho dayn aan run ahayn, oo ay khasab tahay inaad bixiso
- Aanad awoodin inaad adigu wax doorato marka la eego goorta iyo halka aad ka shaqaysan doonto, iyo sidoo kale kale haddaanad awoodin inaad joojiso shaqaynta markaad doonto
- lagu siiyo aqoonsi iyo dokumentiyada socdaalka been-abuur ah, haddii aanad adigu maamulayn dokumentiyadaada, ama haddii aanad haysan wax dokumenti ah habayaraatee

KA FAA'IDAYSIGA XAALADAHA NUGUL WAA MARKA QOFI KUGU QANCIYO INAAD OGGOLAATO IN LAGAA FAA'IDAYSTO XAALADDA AANAD AWOOD U LAHAYN INAAD WAX KALA DOORATO.

## 2. HALKEE AYAAD KA HELI KARTAA CAAWIMO?

Haddaad la kulantay ficil dambiilenimo, waxaad la xidhiidhi kartaa xarunta mashaakilka. Waxaad wici kartaa ood heli karaa macluumaad iyo talo kusaabsan xuquuqdaada, ama u iman kartaa la socodka qoraal-ku-halka iyo helista tooska ah. Taleefanada xarunta mashaakilka waxa laga heli karaa websaytka soo socda: www.krisesenter.com  Adiga iyo carruurtaadu  sidoo kale waxaad ku joogi kartaa bilaash muddo haddaad u baahan tahay ilaalin iyo kaalmo.

SIDOO KALE WAXAAD LA XIDHIIDHI KARTAA WAXA SOO SOCDA:

- Bilayska – lambarka bilayska degmadu waa 02800.
  Lambarka gurmadka. 112.
- Xafiiska La-talinta Dhibbanayaasha Dambiga
  Tel. 815 20 077, www.kriminalitetsofre.no
- ROSA (Dib-u-aasasidda, Abaabulka Meelo Ammaan ah oo la Joogo, Ammaanka, Kaalmada), talada iyo macluumaadka qof kasta oo ah dhibbane ka ganacsiga dadka
  Tel. 22 33 11 60, www.rosa-help.no
- Khadka Caawimada Guurka Khasabka iyo Gudniinka Gabdhaha ee Laanqayrta Cas ee Norway iyo
  Tel. 815 55 201
- Kooxda Khabiirada ee Kahortagga Guurka Khasabka Gudniinka Gabdhaha:
  Tel. 47 80 90 50, kompetanseteamet@imdi.no
- Bilaa lacag ku wac khadka caawiamda Galmada Dadka Qaraabada ah iyo Gabboodfalka Galmeed: Tel. 800 57 000
- Ku wac Khadka Caawimada bilaash si aad talo iyo tilmaam uga hesho: Tel. 800 40 008, www.Stottetelefon.no
- Xarunta handadaada ama A&E halka aad ku nooshahay ama aad joogto
- Xarunta caafimaadka ama xafiiska la-talinta qoyska halka aad ku nooshahay

## 3. OGGOLAANSHAHA GURYAHA NORWEGIAN-KA EE LAMMAANAA LAGU GABBOODFALAY

Haddii laguugu deeqay guri Norway iyadoo ugu wacan tahay dib u midaynta qoyska ee lammaanahaaga, waxaad dalban kartaa oggolaansho kadib saddex sano. Haddaad ka baxdo midba midka kale kahor intaan laguugu deeqin oggolaanshahan, waxa hubaal ah inaanad mutaysan inaad degto Norway.

Hase yeeshee, waxaad dalban kartaa oggolaansho deggani haddii adiga ama carruurtaadu la kulanteen gabboodfal jidheed ama nafsiyeed intaad wada noolaydeen. Kuma tacaluqdo inay adiga ama lammaanahaaga ahaa kan soo afjaray xidhiidhka.

Waa inaad caddayso inaad la kulantay gabboodfal. Qaababka caddaynta gabboodfalka waxa kamid ah samaynta bayaankaaga ama ka helista bayaan dhakhtar, xarunta mashaakilka, dhakhtar cilmi-nafsi, xarun caafimaad, saaxiibado ama qof kale oo goobjoog ka ahaa gabboodfalka.

Uma baahnid inaad tabiso xaaladaha, laakiin waxaad u baahan doontaa inaad la hadasho bilayska. Kadibna waxay qori doonaan warbixin kusalaysan bayaankaaga iyo caddaymaha loo diray UDI, oo uu la socdo dalabkaagu.

**WAXAAD KALIYA MUTAYSAN DOONTAA CAAWIMO LOOYAR MARKA DALALKA SIDAN LOO DIIDO.**

# 4. OGAYSIINTA BILAYSKA

Haddaad la kulantay gabboodfal ama xadgudubyo dambiilenimo oo kale waxa aad u muhiim ah inaad u tabiso bilayska. Sabab kaliya ood tan u samaynayso waa in ogaysiinta noocan ah ay lama-huraan u tahay haddaad ka dalbato dawladda magdhawga dhibbane. Waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo kusaabsna tan Qodobka 9.

### 4.1 Sideen bilayska u ogaysiiyaa?

Waa inaad la xidhiidho bilayska meesha aad ku nooshahay ama aad joogto. Waxaad xaq u leedahay inaad la hadasho bilayska adigoon waxba/cidna u tabin. Waxa jira suurogalnimo in bilaysku uu dacwayn karo xaalado halis ah, sida gabboodfalka galmeed ee carruurta iyo kiisaska kufsiga. Tani waxay ka dhigan tahay in maamulka dadwaynuhu uu sii wadi doono inuu baadho kiiska adigoon gaboodfalka u tabinayn ama cid kale u tabin. Waxaad aalaaba awood u yeela doontaa inuu ku raaco saaxiib, ama waxaad caawimo ka heli kartaa looyar kahor tabinta dambi. Waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo kusaabsan kan Qodobka 7.

### 4.2 Maxaa ka dhaca saldhigga bilayska?

- Markaad soo gasho saldhigga bilayska,  waxaad awoodi doontaa inaad la hadasho dambi-baadhe. Ugu horrayn waxaad inta badan awoodi doontaa inaad si xor ah ugala hadasho waxa dhacay. Baadhuhu wuxuu kadib ku waydiin doonaa su'aalo si uu u helo xaqiiqooin awood u siisa inuu baadho kiiskaaga. Markaa waxa muhiim ah inaad u sharraxdo wax kastaa siduu u dhacay. U sharrax sidaad ula kulan tahay dhacdada sida ugu faahfaahsan. Tusaale ahaan, waxa dhici karta inay fikrad fiican tahay inaad qorto waxaad la kulantay ood bilayska u qaadato. Inta baadhistu socoto bilaysku wuxuu ka shaqayn doonaa inuu helo caddayn si uu awood ugu siiyo inuu eedaymo soosaaro.
- Haddaad la kulantay xadgudub ood dhaawacyo muuqda leedahay, dhaawacyada waa la sawiri. Haddii lagu kufsaday, bilaysku wuxuu kuu qaadi xarunta gabboodfalka sidaa darteed dhakhtar ayaa dokument garayn dhaawacyadaada waxaanu ururin caddayn isagoo fulinaya baadhis xubinta taranka haweenayda.
- Bilaysku sidoo kale wuxuu ku waydiisan inaad rabto inaad ka raadiso magdhaw ka kugu gabboodfalay haddii dacwadda dambiilenimo maxkamad la geeyo. Waa muhiim inaad sheegto haddaad tan jeclaan lahayd.
- Waa inaad saxeexto warbixintaada. Waxa kadib lagu siin xaqiijin qoraal ah ee xaqiiqda in aad tabisay arrinka.
- Bilaysku wuxuu qaadi karaa tallaabooyin loogu talogalay in lagugu ilaaliyo, tus., ilaalinta ah qaab xakamaynta nidaamka ama waxa lagu siin karaa digniin bixiye ammaan.

## 5. DIGNIIN BIXIYE AMMAAN

Haddaad la kulantay hanjabaado ama xadgudub, bilaysku wuxuu ku siin karaa digniin bixiye ammaan oo bilaash ah. Digniin bixiyahani wuxuu si toos ah ugu xidhan yahay xarunta gurmadka bilayska sidaa darteed waxaad la samayn kartaa xidhiidh toos ah bilayska haddii xaalad khatar lihi dhacdo.

### 5.1 Sideen ku heli karaa digniin bixiye ammaan?

Uma baahnid inaad tabiso xadgudub dambiilenimo, laakiin adiga ama cid kale oo ku matalaysaa waxay u baahan doontaa inaad dalbato digniin bixiye ammaan. Bilayska ayaa kaa caawin doona inaad samayso tan.

### 5.2 Inteen haysan karaa digniin bixiyahayga ammaanka?

Haddii laguu qoondeeyey digniin bixiye ammaan, waxaad awoodi doontaa inaad haysato saddex bilood. Bilayska ayaa kadib go'aamin doona haddaad haysan karto xilli dheeraad ah isagoo ku samaynaya qiimayn xaaladdaada ammaan.

## 6. AMAR XAKAMAYNEED

### 6.1 Waa maxay amar xakamayneed

Amar xakamayneed wuxuu ka dhigan yahay in cid kasta oo lagu soo rogo aan loo oggolaan doonaan inuu joogo meel cayiman, booqdo ama si kaleba kula soo xidhiidho. Tani waxay u dhici kartaa, tusaale ahaan, qaab wicitaano, iimayl diris, waraaqo ama farriimo qoraal. Amarada xakamayneed waxa loo soo rogaa in laga hortago inaad la kulanto hanjabaado ama xadgudub.

Hadday jirto khatar badan ee xadgudubka dambiilenimo oo lagaa galayo, qofka ay khusayso waxa laga xannibi karaa inuu guriga kula joogo

### 6.2 Ayaa go'aamiya haddii amarka xakamayneed lagu soo rogi karo qof?

Maamulka dacwad oogista (bilayska) ayaa go'aamiya in amar xakamayneed lagu soo rogo ama aan lagu soo rogin qof kasta uu kuugu hanjaba inuu xadgudub kugu sameeyo. Amarkan xakamayneed intaas kadib baadhi doonta maxkamad. Adiga iyo qofka adiga dartaa loogu soo rogay amarka waxa la idiinka yeedhi doonaa dhagaysiga maxkamadda, in kastoo awoodaada dhibbane ahaan aanay khasab kugu ahayn inaad timaado. Uma baahnid inaad tabiso dambi si amar xakamayneed loo soo rogo. Amar xakamayneed wuxuu ka dhignaan karaa inaad dareento ammaan oo markaas ay kuu fududaato inaad tabiso xaaladahaaga.

# 7. LOOYARKA KAALMADA SHARCI

Looyarka kaalmada sharci waa looyar kaasi oo ku siin doona talo iyo kaalmo kahor intaanad tabin xaaladahaaga, goorta iyo haddaad tabiso xaaladaha noocan ah, inta lagu jiro su'aalista bilayska iyo wixii kiis maxkamadeed ah.

### 7.1 Goorma ayaad mutaysataa looyarka kaalmada sharci?

Waxaad mutaysan doontaa looyarka kaalmo sharci haddaad la kulanto hal ama kabadan ficilada soo socda:

- kufsi
- haddii lagu guursado adoon rabin (guur khasab ah)
- marka qof qaraabo dhaw ah ama qoyska ah ugu sameeyo ficilo xadgudub oo halis ah ama gabboodfal
- ka ganacsi dad
- gudniinka gabdhaha
- haddii qofi jabiyo amarka xakamayneed ee lagu soo rogay marka adiga la eego
- wixii dhacdooyin kale ah ee qabto dhaawacyo jidheed ama nafsi ficiladan dartood

Carruurta ayaa sidoo kale mutaysan looyarka kaalmada sharci hadday la kulmaan gabboodfal galmo.

### 7.2 Muxuu looyarka kaalmada sharci kaa caawin karaa?

Looyar kaamo sharci wuxuu kaa kaalmayn doonaa markaad ka fikirayso inaad tabiso inaanad tabin xaaladahaaga. Waxa uu kuu raaci doonaa bilayska waxaanu kaa caawin inaad qorto waxa dhacay. Waxaanu sidoo kale waydiisan karaa amar xakamayneed iyo digniin bixiye ammaan.

Looyarkaagu sidoo kale wuxuu awoodaa inuu ku caawiyo haddii kiiskaagu maxkamad aado. Wuxuu kuu sharxi doonaa waxa dhaca muddada kiiska maxkamadda, ooy kujiraan wixii su'aalo lagu waydiin doono. Looyarkaagu waxa xaq loogu yeelan doonaa inuu joogo inta kiiskaag maxkamaddu socdo oo dhan. Haddaad danaynayso, looyarkaagu sidoo kale wuxuu awoodi doonaa inuu kaa caawiyo inaad ku andacooto magdhaw ka yimaada cid kasta ood u tabisay.

Haddaad mutaysatay in looyar adeeg sharci laguu magacaabo, kaalmadan waxay noqon doontaa bilaash mana inaad qayb bixiso kharashka.

**7.3 Maxaad samayn doontaa haddaanad mutaysan looyarka kaalmo sharci oo aad ka baqayso inaad marag ka noqoto kiiskaaga maxkamadeed?**

Waxaad la xidhiidhi kartaa Xafiisyada La-talinta ee Dhibbanayaasha Dambi. Xafiisyadan waxay ku yaalaan waddanka oo dhan waxayna ku yaalaan magaalooyinka waawayn. Xafiisyada La-talinta ee Dhibbanayaasha Dambi waxay bixiyaan taageero marag wayna ku caawin karaan kahor intaanad caddayn bixin, waxaana sidoo kale loo oggolaan inay kuu raacaan maxkamadda markaad caddaynta bixinayso. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad xidhiidh la samayso adeegyada taageerada marag ee kale.

Xafiisyada La-talinta ee Dhibbanayaasha Dambi wuxuu sidoo kale bixin karaa caawimo qaab taageero wicitaano ah, talo iyo tilmaam kusaabsna xuquuqaha kale iyo sidoo kale kaalmo arrimaha sida dalbashada magdhaw ee dhibbanayaasha xadgudubka iyo kaalmo sharci oo bilaash ah. Waxa ku xidhan waajibaadka qarsoodinimo.

XIITAA HADDAANAD HAYSAN LOOYAR KAALMO SHARCI, WAXA MUHIIM AH INAAD INAAD OGAATO, AWOODAADA DHIBBANE AHAAN,IN SI FIICAN LAGUU DARYEELI DOONO KAHOR KIISKAAGA MAXKAMADDA.

# 8. DHIBBANAHA KA GANACSIGA DADKA WAA MAXAY XUQUUQDAADU?

Haddaad tahay dhibbane ka ganacsiga dadka ood tahay mid ka go'an ama isku tixgalinaya mid ka go'ay bey'addan, waxaad dalban kartaa deggani kumeel gaadh ah iyo oggolaansho shaqo oo ilaa 6 bilood ah. Kan waxa la dhahaa wakhtiga caksinta. Lagaagama baahna inaad soosaarto caddayn si aad muujiso inaad tahay dhibbane ka ganacsiga dadka. Fikraddu waa inaad ku qaadato 6-dan bilood ku laabashada xaalad nolol ammaan ah iyo caddaynta haddii aad rabto ama aanad rabin inaad u tabiso kiiska bilayska.

Waxaad ka dalban kartaa wakhtiga caddaynta Qaybta Socdaalka ee saldhigga bilayska deegaankaaga. Waxay ku waydiin woxogaa su'aalo ah, kaa qaado sawiro iyo faro, oo diiwaangalin una gudbin dalabkaaga UDI. Waxa kula socon kara looyarkaaga kaalmada sharci iyo cid kale oo kasta ood aamini karto markaad bilayska u tagayso si aad u dalbato caddaynta.

Haddaad tabiso arrinka, waxaad ka dalban kartaa UDI 1-sano oo dheeraad shaqo kumeel gaadh ah iyo degganaasho.

Oggolaanshahan waa la cusboonaysiin karaa haddii aad buuxiso shuruudaha, kuwaasi oo ah sida soo socota: caddaymo waa in laga helo bilayska muujinaya inaad la shaqaynayso bilayska marka la eego dacwadaha dambiilenimo ee dadka ka dambeeyey ka ganacsigan iyo bilayska oo u tixgaliya joogitaankaaga Norway inuu lama-huraan u yahay fulinta baadhitaanadooda iyo fulinta kiiska. Sidoo kale waxa shardi inaad ka go'day silsiladaha ka masuulka ah ka ganacsiga dadka.

Laga soo bilaabo Noofambar 1, 2008 xeerka guud waa in dhammaan dhibbanayaasha ka ganacsiga dadka ee bixiyey caddayn dacwaynta dambiilenimo ee lagaga soo horjeedo kuwa ka masuulka ah, waxa loogu deeqaa degganaasho kaasi oo noqon doona aasaaska degganaasho abadi ah iyo oggolaansho shaqo Norway dhexdeeda. Tani waxay khusaysaa dhammaan muwaadiniinta. Tani waxay ka dhigan tahay in marka bilaysku uu soo gabagabeeyo baadhistooda kiiska kaasi oo aad ku caawinaysay awoodaada marag ahaan/cidda cabanaysa ahaan, waxaad dalban karaa degganaasho abadi ah Norway.

# 9. MAGDHAWGA DHIBBANAYAASHA XADGUDUBKA

Haddaad la kulantay ficilo dambiilenimo sida ku cad qodobka 1.1, waxaad ka dalban kartaa magdhawga dhibbanayaasha xadgudub dawladda Norway. Kahor intaanad dalban karin, waxa khasab ah inaad marka hore tabisay ficilka laga hadlay.

Haddaad mutaysatay looyarka kaalmo sharci, wuxuu kaa caawin doonaa inaad dalbato magdhawga noocan ah.

Kaalmo ayaa sidoo kale bilaash lagaga heli karaa mid kamid ah xafiisyadayada qaran ee dhibbanayaasha dambi.

Haddii qofi ku waayo naftiisa ficilka dambiilenimo, magdhawga waxa la siin karaa lammaaniaha, rafiiqa, carruurta ama waalidkiisa nool.

Haddii arrinka la tabiyo, laakiin bilaysku laalo kiiska, waxa dhici karta marmarka qaar inaad hesho magdhaw bilaa shuruud.

Haddaanad mutaysan kaalmada sharci, waxaad la xidhiidhi kartaa Talada Sharciga Haweenka (JURK), tel. 22 84 29 50 ama Xafiisyada La-talinta qaranka ee Dhibbanayaasha Dambi, tel. 815 20 077 si aad u hesho caawimo dalbashada magdhaw dhibbanayaasha xadugub.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri www.voldsoffererstatning.no

**HADDII CARRUURTAADU AY GOOBJOOG KA AHAAYEEN XAQIIQDA AH INAAD LA KULANTAY XADGUDUB, SIDOO KALE WAXA DHICI KARTA INAY MUTAYSTAAN MAGDHAW DHIBBANAYAASHA XADGUDUB.**